# Tallaalka Cagaarshowga B

Waxa aad u baahan tahay inaad ogaato



## Waa maxay cagaarshowga B?

Cagaarshowga B waa fayras saameeya beerka wuxuuna kugu ridi karaa xanuun daran

Dadka qaar ee qaba cagaarshowga B weligood kama bogsoodaan fayraska waxaana laga yaabaa inay cudurka la noolaadaan noloshooda oo dhan. Kani waa cagaarshowga B ee muddada-dheer, dadka qabana waxa loo yaqaana "sidayaal."

Qaar ka mid ah sidayaasha ayaa sii wada inay qaadaan cudurka beerka oo daran. Qaar ka mid ah sidayaasha ma laha calaamado waxaana laga yaabaa inayna ka warqabin inay caabuq qabaan sidaa darteed ayay fayraska ugu faafiyaan kuwa kale iyagoon ogayn.

## Waa maxay cagaarshowga B ee muddada-dheer?

Dadka qaarkiis weligood kama bogsoonayaan fayraska. Waxaa laga yaabaa inaad caabuqa la noolaato noloshaada oo dhan waxaadna cagaarshowga B ku faafin karta dadka kale. Kani waxa loo yaqaanaa caabuqa cagaarshowga B ee muddada-dheer waxaana laga yaabaa in dadka qaba ay dadka kale qaadsiiyaan.

Waxaa laga yaabaa inaad noloshaada oo dhan dareento caafimaad qab oo aadan muujin caddayn dhaawaca beerka ah. Dadka qaarkiis waxaa ku dhaca cudurka beerka oo aad u daran, sida nabar yeelashada beerka (cirrhosis), beerka oo aan shaqaynayn ama kansar. Haddii aad qabto cagaarshowga B, waxaad weli qaadi kartaa noocyada kale ee cagaarshowga sida cagaarshow A ama C.

## Sidee ayuu ku faafaa?

Cagaarshowga B waxa uu ku faafaa marka uu u bayla noqda dhiigga ama dareeraha jirka ee qofka cudurka qaba. Waxaad qaadi kartaa cagaarshowga B haddii aad:

- Galmo la samaysay qof sidda cagaarshowga B.
- La wadaagto cirbadaha ama qalabka kale marka aad mukhaadaraad isku durayso.
- Isticmaasho cirbadaha aan la nadiifin inaad ku dalooliso jirka, ku shaababadaysato, ku toobinto, ku qurmiso korontada, ama haddii lagugu duro irbad la isticmaalay.
- La wadaagto sakiimaha, burushyada ilkaha, dharka dhaqmada, shukumaanada, cidiye jarayaasha ama wax kasta oo laga yaabo in dhiig ama dareerayaasha kale ee jirka leh.
- Xiriir la yeelato nabarro dhiig baxaya ama meeel jeexan oo qofka cudurka qaba leeyahay.
- Tahay shaqaale daryeel caafimaad ama qof kale oo u bayla noqday dhiiga ama dareeraha jirka ee qofka cudurka qaba.

- Tahay canuga qof sidda cagaarshowga B.

Xaaladaha qaarkood, isha saxda ah ee caabuqa waligeed lama aqoonsan karo.

**Kuma qaadi kartid cagaarshowga B markaad**

- **Hindhisto ama qufacdo**
- **Dhunkanayso ama habsiinayso**
- **Naasnuujinayso**
- **Cunto ama biyo**
- **La wadaagayso suxuunta ama galaasyada**
- **Xiriirka caadiga ah (sida marka la joogo shaqada)**

## Khatar miyaan ku jiraa?

Kooxaha soo socdaa waxay halis dheeraad ah ugu jiraan caabuqa HBV waana inay qaataan tallaalka cagaarshowga B haddii aan difaac lahayn:

**a) Dadka khatarta shaqo ugu jiro inay u bayla noqdaan dhiig ama deegaannada dhiiga ku wasakhaysan**

- Dhakhaatiirta, kalkaalisooyinka, dhakhaatiirta ilkaha, umulisooyinka, shaqaalaha shaybaarka, farsamayaqaannada qolka mayadka, shaqaalaha ambalaaska, shaqaalaha nadaafadda, xamaalayda, ardayda caafimaadka, kalkaalinta iyo ilkaha, xirfadlayaasha kale ee daryeelka caafimaadka.
- Shaqaalaha iyo daryeelayaasha ku sugan xarumaha loogu talagalay kuwa caqliga naafada ah (ay ku jiraan xarumaha xanaanada maalinta, dugsiyada gaarka ah iyo xarumaha kale).
- Shaqaalaha xabsiga ee xiriirka joogtada ah la leh maxaabiista.
- Shaqaalaha amniga iyo gurmadka degdega ah
  - Xubnaha adeegyada amniga iyo badbaadinta
  - Xubnaha An Garda Síochána
  - Xubnaha adeegga ciidanka dab-damiska
  - Xubnaha ka tirsan ciidamada qalabka sida
  - Shaqaalaha shirkadaha amniga.
- Shaqaale kasta oo kale oo laga yaabo inay u bayla noqdaan dhaawacyada dhiigga.

**b) Xiriirada qoyska iyo reerka**

- Dhallaamada ay dhaleen hooyooyinka qaba caabuqa HBV ee ba’an ama muddada-dheer (sidoo kale hoos ka eeg ka hortagga u bayla noqoshada ka dib).
- Xiriirada labada qof ee isqaba, lammaanaha galmoodka ah, qoyska iyo reerka ee kiisaska ba’an ah iyo shakhsiyaadka qaba caabuqa muddada-dheer. Meesha baaritaanka calaamadaha caabuqa hadda ama hore caafimaad ahaan lagu muujiyay, tan waa in la sameeyaa

isla waqtiga qoritaanka garoojada koowaad. Tallaalka waa in aan dib loo dhigin inta la sugayo natiijooyinka baaritaanada. Garoojooyin dheeraad ah ayaa laga yaabaa inaan looga baahnayn kuwa leh caddayn cad oo u bayla noqosha hore ah.

**c) Korsashada/korrinta**

- Tallaalka waxaa lagula talinayaa qoysaska soo korsanaya carruurta ka imaanaya wadamada uu ku badan yahay ama dhexdhexaadka yahay caabuqa HBV. Carruurtan waa in laga baaro caddaynta caabuqa HBV ee hadda ama hore.
- Dhammaan daryeelayaasha korinta muddada-gaaban iyo qoysaskooda ee helay meelaynta degdegga ah waa in la siiyaa tallaalka cagaarshowga B. Daryeeleyaasha korinta joogtada ah iyo qoysaskooda, kuwaas oo aqbala canug la og yahay inuu halis sare ugu jiro HBV, waa in sidoo kale la siiyaa tallaal.

Fiiro gaar ah: Waxa sidoo kale loo baahan karaa tallaalka cagaarshowga A.

**d) Ku durista isticmaalayaasha mukhaadaraadka (IDUs) iyo dadka ay la xiriiraan**

- Dhammaan IDU-yada
- Xiriirada reerka, carruurta iyo lammaanaha galmoodka ee IDU-yada.
- Kuwa halista ugu jira inay u gudbaan isku durista isticmaalka mukhaadaraadka (ay ku jiraan kuwa hadda dhuuqa heroin-ka iyo/ama kookeynta buskudaysan ama isticmaalayaasha amfetamiinka ee aadka ugu tiirsan).

**e) Shakhsiyaadka khatarta sare ugu jira xaalado caafimaad dartood**

- Kuwa sida joogtada ah loogu shubo dhiig ama waxyaabaha dhiigga, iyo daryeelayaasha ka mas'uulka ah maamulka waxyaabahaas.
- Kuwa qaba naafanimada garaadka ee xaadira xarumaha sida xarumaha xannaanada maalinta, dugsiyada gaarka ah iyo qaybaha kale.
- Bukaanada qaba kelyaha xanuunka muddada-dheer. Waxaa lagu talinayaa in la bixiyo tallaalka cagaarshowga B ee loo qaabeeyey si loogu isticmaalo bukaanada qaba kelyaha xanuunka muddada-dheer (Fendrix ama HBVAXPRO40). Jawaabcelinta difaaca ee ku aadan tallaalka cagaarshowga B waa la dhimi karaa marka loo eego shakhsiyaadka leh awooda difaaca jirka waxaana la arki karaa hoos u dhac degdeg ah oo ku yimaada anti-HBs.
- Bukaanada qaba cudurka beerka ee muddada-dheer oo ay ku jiraan kuwa qaba caabuqa cagaarshowga C ee joogtada ah.

- Bukaannada aan difaaca lahayn oo ay u badan tahay inay noqdaan kuwo difaaca jirkoodu liito, sida kuwa qaata tallaalida xubnaha ama kuwa qaata wakiilada habdhiska difaaca jirka.
- Dhallaamada u bayla noqda iyo kuwa qaba HIV waa in la siiyaa tallaalka Cagaarshowga B marka ay dhashaan ka dibna waa in lagu sii wado jadwalka carruurnimada ee caadiga ah.

**f) Dadka khataraha kale ku jira**

- Shakhsiyaadka sida badan u beddela lammaanaha galmada, ragga u galmooda ragga kale (MSM), ragga iyo dumarka ka shaqeeya ganacsiga galmada, dadka ku hawlan galmada dabada, ka qaybqaatayaasha xarumaha loogu talagalay cudurada galmada lagu kala qaado (STIs) iyo kuwa laga helay STI.
- Xarumaha maxaabiista lagu hayo.
- Fannaaniinta/dhakhaatiirta shaabada iyo jirka daloolisa.
- Soo-galootiga ka yimaada aagagga leh heerar sare ama dhexdhexaadka ah caabuqa HBV.
- Dadka hoy la'aanta ah.
- Carruurta ay dhaleen waalidiin ka yimid dalal caabuqa uu ku sareeya ama dhexdhexaad ka yahay.
- Safarayda u socota aagagga uu ku badan yahay ama dhexdhexaad ka yahay caabuqa HBV

## Tallaalka

- Tallaalka cagaarshowga B waa badqab, tallaal waxtar leh iyo hab aad u wanaagsan oo lagu ilaaliyo naftaada.
- Tallaalka waxaa badanaa lagu bixiyaa koorso saddex irbadood ah - booqashadaada ugu horreysa ee rugta caafimaadka, hal bil ka dib iyo lix bilood ka dib duritaanka koowaad.
- Saddex irbadood ka dib, waxaa laga yaabaa in mararka qaarkood lagaa qaado baaritaanka dhiigga si loo hubiyo in aad hadda difaacan tahay iyo in kale.
- Dadka qaarkiis waxay u baahan doonaan garoojo(-oyin) dheeraad ah oo ka mid ah tallaalka. Tiro aad u yar oo dad ah kama jawaabcelin doonaan tallaalka mana difaacno.
- Waxyeellada tallaalka waxaa laga yaabaa inay tahay cudud xanuun iyo gaduudasho meeshii irbada lagaaga duray.
- Haddii aad uur leedahay ama aad qorshaynayso inaad uur yeelato, la hadal dhakhtarkaaga ka hor inta aadan qaadan tallaalka.
- Tallaalka kama qaadi kartid cagaarshowga B.

**Tallaalka Qaado**

## Soo koobitaanka:

- Cagaarshowga B waa cudur halis ah laakiin waa laga hortagi karaa.
- Waxa lagu kala qaadaa marka uu taabto dhiigga ama dareeraha jirka qofka cudurka qaba.
- Tallaalka iyo nadaafadda wanaagsan waxay kaa ilaalin karaan cagaarshowga B.

## Sidee ayaan wax dheeraad ah u ogaan karaa?

Macluumaad waxtar leh oo ku saabsan cagaarshowga B waxaa laga heli karaa ilaha soo socda:

- Dhakhtarka qoyskaaga
- Waaxda caafimaadka shaqadaada
- Waaxda caafimaadka dadweynaha ee deegaanka ee HSE

Waxaad ka heli kartaa macluumaad iyo buug-yarayaal kale oo ku saabsan cagaarshowga B mareegaha soo socda:

- www.hpsc.ie
- www.cdc.gov/hepatitis/hbv
- www.who.int
- www.immunisation.ie
- www.emitoolkit.ie

Taariikhda daabacaada: Abriil 2017

Qorayaasha: Kooxda Shaqeynta Cagaarshowga ee Kooxda Cudurada Faafa ee Daawada Caafimaadka Dadweynaha, Waaxyaha Caafimaadka Dadweynaha iyo Xarunta Kormeerka Ilaalinta Caafimaadka, Fulinta Adeegga Caafimaadka.